

SIDA LOOLA HADLO JIIRAANKAAGA

- **Ku bilaab cidda aad tahay:** “Waxan ahay bixiye xanaanada ilmaha qoyska ee meel u dhow jidka. Waxan bixiye ahaa [# sanno] oo aan xanaaneeyey [# oo carruur ah] oo ku salaysan maalinle,”
- **Diiradda saar carruurta:** “Dhibaataaynta ku dhacaysa bixiyayaasha gudaha dalkeena waxay halis gelinaysaa ilmaha aan xanaaneeyo. Waan inaan ilaalino ilmaheena iyo barayaasha carruurnimada hore ee xanaaneeya iyaga,”
- **Xooga saar saamaynta bulshada:** “Qoysasku ma shaqayn karaan, oo ganacsiyada deegaanku waxa gaaraysa dhibaato haddii xanaanada ilmuhu ay lunto.”
- **Si deggan u sax been-abuurista:** “Bixiyayaashu waa shatiilayaal, xirfadyahano sharciyaysan oo daruuri u ah bulshooyinkeena.”
- **Diiradda saar xalka:** “Aan ilaalino xanaanada ilmaha ee bulshadeena, ma aha in aan weerarno bixiyayaasha qoysaska ee aan ku tiirsannahay.”

MACLUUMAAD MUHIIM AH EE LAGA HADLI KARO

- Hadda, habka xanaanada Ilmaha California waxa ku socda weerar.
- Kadib warbixinadii beenta ahaa ee musuqmaasuqa gudaha Minnesota ay keeneen buuqa iyo dhibaata, weeraro la mid ah oo ay hagayaan nacayb ayaa hadda lala beegsanayaa bixiyayaasha Soomaalida ah ee gudaha San Diego.
- Weeraradaas waa kuwo aan cadaalad ahayn; waxay salka ku hayaan midab-takoor iyo been-abuur.
- San Diego waxay hoy u tahay mid ka mid ah bulshooyinka Soomaalida ugu weyn ee waddankan, hadana sheegashooyin been ah ayaa loo adeegsanayaa si loo mariyo jarista bilyano maalgelinta federaalka ee gobolada sida California.
- Taasi waxay halis helin doontaa ku-dhawaad **100, 000** oo caruur ah oo waxay sii naafayn doontaa habka xanaanada ilmaha oo marka horeba jilicsamaa. Tani waa marin-habaabid siyaasadysan oo ka fog xaqiiqada: qoysasku waxay u baahan yihiin xanaanada carruurta oo la-awoodi karo.

AYEY YIHIIN BIXIYAYAASHA XANAANADA ILMUHU

- Bixiyayaasha xanaanada ilmuhu waa shatiilayaal, baraayaal carruurnimada-hore, hantiilayaal ganacsiyo yaryar, iyo xirfadlayaal xirfad leh oo guryahooda u furay maalin kasta si ay ugu adeegaan qoysaska daafaha California.
- Waxay ka dhigaan xanaanada ilmaha waxa la heli karo iyaga:
 - Aqbalaya kaababka sida CalWORKS iyo barnaamijyada kale ee gobolka
 - Siinaya saacado dabacsan waalidiinta shaqeeya subaxda hore, habeenkii, iyo wiikanada
 - Bixinaya jawi dhaqan iyo luqad ahaaneed oo ilmuhu dareemaan amaan iyo taageero
- Bixiyayaasha xanaanada ilmaha qoyska waa kaabe daruuri u aha ilmaha, qoysaska, iyo bulshooyinka – oo waxay istaahilaan maalgelin, ilaalin, iyo taageero.